

Hyresgästföreningen

# Waxyaalo anaga nagu saabsan

Warbixin ku saabsan Ururka kireystayaasha:

# Waxay aragtidayadu tahay hoy sugan halkaas oo ay dadka iyo bulshadu horumaraan





Fikrada waxqabad ee Ururka kireystayaasha

Iyadoo loo soo maraayo in la isku abaabulo dadka kireystayaasha ah si ay Ururka kireystayaasha uga qeybqaataan, mas'uuliyadeeda qaadaan oo aanay yihiin cidda horumarka bulshada wada. Waxaanu taas sameynaa iyadoo:

Aanu nahay goob kulan oo muhiima ah oo arrimaha guryaha qaabilsan

Abuurna saameyn ku yeelasho, amaan iyo isku xidhnaan goobaha degaanka

Xubnaha siiya aqoon, talo iyo adeeg

Daneeyayaasha kale ku soo martiqaada in wadahadal iyo wadashaqeyn lala yeesho

Isticmaala xaqiiqooyin iyo khibrado laga oo qaadanaayo deganaanshaha guryaha ee dadka si loogu saameeyo siyaasadda iyo sharciga dejinta

Gorgortanka kirooyinka u sameeya kireystayaasha Iswiidhan

# Hadafkayaga

Waxa uu Ururka kireystayaashu waxqabadyada oo dhan ka leeyahay saddex hadaf.

**Xaq loo yeesho in la deganaado**
In meel la deganaayo ayaa ah xuquuq bani'aadamnimo. Sidaa darteed, waa in guryo badan la dhisaa oo hab waara loo dhisaa.

**La awoodi karo in la deganaado**
Qofka kiraystaha ah iyo bulshadaba waxay dani ugu jirtaa in heerka kireysigu mid macquul ah ahaado.

**Ay xiiso leedahay in la deganaado**
Saameynta xuquuqda kiraysashadu waxay u baahan tahay inay sii korodho oo heerka xuquuqda kiraysigana kor loo soo qaado si ay dadka oo dhami ugu noqdo qaab loo degan yahay oo soo jiidasho leh.

Wax dheeraad ah oo hadafyadayada ku saabsan ka akhri hyresgastforeningen.se



# Sidaas ayaynu qaar abaabulan ku nahay


Waxaanu go'aannada u gaarnaa nidaam dimuqraadi ah iyadoo dadka ay go'aamadu khuseeyaan ay awood ugu helaan inay saameyn ku yeeshaan. Waxa dhamaan heer kasta ay cida go'aannada guud ka gaaraysa sida waxqabadka loo maamulaayo yihiin xubnaha la soo doortay.

**Goobaha ay ka dhisanyihiin guryaha la degganyahay**
Waxa meel badan ku yaala ururka kireystayaasha ee deegaanka ama wakiil guri ayaa jooga. Waxa meel kalena jiri kara kooxo shaqo oo ka shaqeeya arimaha ku meel gaarka ah ama arimo gaar ah. Su'aalaha guud ee dadka degan ay qabaan ayaa lala soo qaadayaa milkiilaha ama masuulka. Waxay taasi noqon kartaa wax kasta laga bilaabo wadahadal khuseeya goobaha ay ka dhisanyihiin guryaha la degganyahay ku yaalaan, ilaa in toos loogu saameeyo daryeelka goobta degaanka ama kirada.

**Degmada**
Waxaanu heerka degmo ahaan wada xaajoodka kirada la sameynaa shirkadaha guryaha ee deegaanka ku yaala. Waxa uu xitaa ururku ka shaqeeyaa inuu saameeyo arrimaha kale ee guriyeynta khuseeya ee degmada dhexdeeda.

**Gobolka**
Waxaanu heer gobol ahaan isku dubaridnaa hawlaha looga baahan yahay gobolka dhexdiisa. Waxa halkan ku jira khibrad la isku soo ururiyey oo arrimaha deganaanshaha guryaha ee kala duwan ku saabsan.

**Wadanka oo dhan**
Waxaanu heer qaran ahaan ka shaqaynaa arimaha saameynta siyaasadda guryeynta ee kirada iyo wada xaajoodyada la xidhiidha. Marka uu baarlamaanku sharciyo cusub oo goobaha ay ka dhisanyihiin guryaha la degganyahay khuseeya dejinaayo ayaa badiyaa khubaradayada wax la waydiiyaa.




**1. Goobaha ay ka dhisanyihiin guryaha la degganyahay**

**Ururka kiraystayaasha ee degaanka** – waxqabad xaafadaha ama goobaha ay ka dhisanyihiin guryaha la degganyahay.
**Shir sanadeedka** – ururka kireystayaasha ee deegaanka kulankiisa ugu sareeya ee go'aan qaadashada.
**Guddiga ururka kireystayaasha ee deegaanka** – waxay xaqiijiyaan/hubiyaan in go'aannada shir sanadeedka la fuliyo.

**2. Degmada**

**Ururka** – waxqabadyada heerka degmada.
**Shir sanadeedka** – ururka kulankiisa go'aan qaadashada ee ugu sareeya.
**Guddiga ururka kireystayaasha** – xaqiijisa in go'aannada shir sanadeedka la fuliyo.

**3. Gobolka**

**Gobolka** – waxqabadka heer gobol.
**Golaha maamulka** – gobolka kulankiisa go'aan qaadashada ee ugu sareeya.
**Guddiga gobolka** – xaqiijisa in go'aannada shir sanadeedka la fuliyo.

**4. Wadanka oo dhan**

**Ururka guud ee qaran** – waxqabadka oo heer qaran ah.
**Shir weynaha** – ururka guud kulankiisa go'aan qaadashada ee ugu sareeya.
**Maamulka ururka** – xaqiijisa in go'aannada shir weynaha la fuliyo.

# Wada xaajoodyada

**Waxaanu wada xaajood kirada u sameynaa dadka kireystayaasha ah ee wadanka degan badankooda. Shaqaalaha iyo xubnaha la soo doortay ayaa labaduba shaqada wada xaajoodka ka qeybqaata.**

Waxaanu wada xaajoodka kirada u sameynaa saddex milyan oo kireystayaal ah iyo 1.5 milyan oo guri. Waxay guryuhu ku yaalaan 300 oo shirkado guri oo ay degmooyinku leeyihiin iyo 45,000 oo guryaha kirada ee gaarka loo leeyahay ah. 4,000 oo xubnaha la soo doortay ka mid ah ayaa wada xaajoodka ka qeybqaata. Waxay iskugeyn ahaan dhammaan kireystayaasha wadanku bixiyaan 113 bilyan oo karoon sannadkii.

### Hadafka wada xaajoodka

Mid ka mid ah hadafyada wada xaajoodka ayaa ah inaanay kiradu dhaafin boqolkiiba 25 isku celceliska ahaan dakhliga cashuurta ka dib la helo ee qofka dakhliga caadiga ahi soo galo. Waana inaanay sidoo kale kiradu kor u kicin wax ka badan inta qiimayaasha kale ee bulshada.

### Kiro isku mid ah guryaha isku midka ah

Waxa gundhig u ah waxa kiradaada go'aaminayaa waa qiimaha isticmaalka ee guriga, taas oo ah tayada iyo heerka guriga. Qiimaha isticmaalka iyo sidoo kale kiradu waa inay ka tarjumayaan qiimeynta kireystayaasha ee tayada kala duwan ee hoyga. Waxay noqon kartaa cabbirka guriga, inta qol, qorshaynta dhulka, heerkiisa, xaaladda, bay'ada/deegaanka dibadda, goobta uu guriga ku yaalo iyo soo jiidashada aagga. Dayactirka iyo adeega ayaa sidoo kale qaybo muhiim oo had iyo jeer wada xaajoodka lagu soo qaado ah.
Markaanu wada xaajoodka sameynayno ayaanu hubineynaa inaanay kiradaadu dhaafin kirada guryaha kale ee u dhigma.



# Ra'yi ururin

**Dad badan ayaa raba inay deganaadaan guryaha xuquuqda kireysiga, wax ka badan inta xuquuqda kireysiga lagu kreysan karo. Waxaynu Ururka kireystayaasha nahay kumanaan xubnood oo wax daneynaaya oo qeyb ka ah oo saameeya oo hoyga dadkana ka sii wanaajiya. Kiraystayaasha hadda iyo kuwa berriba.**

Guryo la'aantu waa wax aad u weyn, iyadoo waxa la dhiso badankooduna ay qaar qaali ah noqdaan. Waxaan rabnaa in la dhiso guryo xaquuqda kireysiga leh oo qiimo macquul ah kuwaas oo ay dadku awoodi karaan inay ku noolaadaan.

Baahida dib u cusboonaysiinta guryaha ayaa mid degdega ah meelo badan oo goobaha ay ka dhisanyihiin guryaha la degganyahay ah. Waxaanu rabnaa in meelahaas dib loo hagaajiyo oo ay kireystayaashu ka qeybqaataan oo ay saameyn ku yeeshaan sida uu hoygoodu u ekaan doono. Waana inay kireystayaashu dareemaan inay ku kalsoon yihiin inay awoodi karaan inay ku sii jiraan marka la dayactiro ka dib.

Waxaanu la kulanaa siyaasiyiinta dalka oo dhan jooga iyadoo aanu internetka ka ololeyno si aanu xalka laga gaadhaayo guri la'aanta ugu muujino. Waxaanu soo bandhignaa xalka si loogu dardargelinayo guryo dhisitaanka iyadoo markaynu tobanaan kun oo kireysteyaal ah nahay cadaadis ugu saari karno siyaasiyiinta baarlamaanka iyo golaha degaanka jooga.

# Deegaanka lagu noolyahay

Dhamaan kireystayaashu waxay xaq u leeyihiin deegaanka lagu noolyahay oo wanaagsan. Waxay shuruud ku xidhaa dhismaha laftiisa iyo deegaanka banaanka ee ku dhow.



**Waxa uu ururka kireystayaashu deegaanka lagu noolyahay uga shaqeeyaa qaab aragti ballaadhan leh. Waxaan ka shaqeyneynaa si aanu ugu abuurno guryo tayo wanaagsan leh oo qiimo macquula ah. Si taas loo gaaro ayay lagama maarmaan tahay in fikradaha tayada iyo ta bay'ada loogu arko wax is wata ka kooban:**

- Nabadgalyada/amniga
- Saamayn
- Guryo si fiican loo qorsheeyay oo si fiican u shaqaynaaya
- Bay'ada gudaha iyo deegaan dibadda oo caafimaad leh oo dhir cagaaran leh iyo fursado lagu ciyaaraayo, lagu madadaasho, oo wadajir loogu joogo iyo adeeg

Waxa uu Ururka kireystayaasha u arkaa inay dhismayaasha cusub iyo kuwa dib loo dhisaayo ay tahay in la qorsheeyo oo la fuliyo iyadoo tayada la ilaalinaayo. Waxaanu u aragnaa in dhammaan guryuhu iftiinka maalinta oo wanaagsan heli karaan. Waxaan rabnaa guriyo aan dadka deggan lagu qashqashaynin buuq iyo gariir. Waxa uu Ururka kireystayaasha sidoo kale rabaa in maadooyinka khatarta laga saaro qalabka dhismaha iyo alaabta. Ma rabno guryo ay maadooyin khatar ahi ku jiraan kuwaas oo xanuun u keenaaya dadka degan oo deegaankana saameeya kara.

Laakiin deegaanka lagu noolyahay ayaa sidoo kale khuseya waxyaabaha maalinlaha/joogtada loo sameeyo sida inaad qashinkaaga kala soocdo. Iyadoo si wada jir ah loola kaashanaayo ururada kale ee guryaha ee SABO, Fastighetsägarna, HSB iyo Riksbyggen, ayuu Ururka kiraystayaashu sameeyey MABO. Waa koox iskaashi oo maaraynta qashinka ah.



# Shaqada caalamiga ah

**Laga soo bilaabo 1983 ayaa, Ururka Kiraystayaashu yahay madaxa International Union of Tenants, IUT, dhaqdhaqaaq caalami oo mideeya 67 ururada kireystayaasha ah oo 45 wadan ka socda.**

IUT sprider erfarenheter och lyfter fram goda exempel. Dessutom arbetar IUT bostadspolitiskt med att visa nyttan av att ha ett stort hyresbestånd med goda och sunda bostäder med rimliga hyror. 2008 etablerade IUT ett lokalkontor i Bryssel för att föra dialog och påverka EU-parlamentets medlemmar och tjänstemännen i EU-kommissionen. Läs mer om IUT på www.iut.nu.

# Juridik

Varje år ger vi hjälp, stöd och service åt tusentals medlemmar. Det kan gälla allt från droppande kranar och drag i lägenheten, till hyreskontrakt som blir uppsagda.

Waxay qareenadayadu xubnaha ku matalaan kiisaska sida guddiga kirada, maxkamada degmada iyo maxkamada rafcaanka. Kiisaska qaarkood ayaa maxkamadda sare lagu go'aamiyaa, inkastoo ay taasi tahay mid aan caadi ahayn.

- 50,000 oo su'aalood ayay sanad walba xubnuhu ka jawaabaan iyadoo la soo maraayo talobixinta Ururka kiraystayaasha.
- 17,000 kiis oo gaar ah ayaa sannadkiiba loo qabanayaa xubnaha taageero heer sare ah u baahan.

Adeegaaga sharcigu waxa uu ku jiraa kharashka xubinnimada.



# Ammaanka

Waxa uu ammaanku ku saabsan yahay ammaanka bulsho ahaaneed – ee lagu dareemaayo in laga tirsan yahay deriskaaga iyo in qeyb laga yahay waxa ka dhacaya meesha aad ku nooshahay.

Waxay bay'ada qaab ahaaneed leedahay boos muhiim ah xitaa marka nidaamkan laga eego. Kuraasta dhaadheer oo irida agteeda taala iyo goobo ciyaaraha oo si wanaagsan loo qorsheeyay ayaa noqon kara meelo ay caadi ahaan dadka degaanki ku kulmaan.

In la dareemo in ammaan lagu yahay guriga iyo bay'ada/deegaanka agagaarkiisa ayaa ah waxa ugu sareeya ee dadka kiraystayaasha ahi hoygooda ku qiimeeyaan. Waxa uu Ururka kireystayaashu faafiyaa aqoonta ku saabsan galdaloolada iyo dhibaatooyinka amnidarada hoyga keenaaya.

Waxa uu Ururka kiraystayaasha la shaqeeyaan milkiilayaasha iyo hay'adaha kala duwan ee goobaha ay ka dhisanyihiin guryaha la degganyahay si ay ugu dardargaliyaan hindisayaasha deegaanka iyo in waxqabdyada kala duwan laga qaybqaato.

# Anaga taariikhdayada

Markii Ururkii kireystayaasha ee ugu horreeyay la sameeyay sanadii 1910-nadii, ayay kireystayaashu ahaayeen qaar aan guri kireeyaha hortiisa wax awood ah ku laheyn. Taas ayaanu ka qaybqaadanay in wax laga bedelo.

**Dib u jaleecasho**

Ururkii kireystayaasha ee ugu horeeyey oo wali sii jira waxa taariikhda 30 Diisembar 1915 lagu aasaasay Nynäshamn. Waxay ahaayeen kiraystayaash guryaha Telegrafverket oo wax ka cabanaayey cida shirka isugu timid. Guryahu waxay ahaayeen qaar aad u liita, oo aan koronto iyo biyo toona laheyn. Dhibaatooyinku way badnaayeen iyadoo dooli/jiirar iyo cayayaanba jireen. Markii mulkiiluhu uu diiday inuu dhibaatada dadka haysata wax ka qabto, ayay dadkii deegaanka ayaa go'aansadeen inay urur kiraysteyaasha iskugu yimaadaan.

Si taas la mid ah ayay ururada kireystayaashu wadanka oo dhan uga bilaabmeen. Sannadkii 1923 ayaa siddeed urur kiraysteyaasha ahi isku biireen si ay u samaysteen Uruka Guud ee Ururka Kiraystayaasha Qaranka (Hyresgästföreningarnas Riksförbund). Sannadkii 1925 ayuu ururku guud ahaa mid waddanka oo dhan gaarsiisan. Markaas ayay ururka guud iskugu yimaadeen qiyaas ahaan 8,000 oo xubnood.

Intaas ka dibna waxa jiray koritaan joogto ah. Waxaynu maanta nahay wax nus milyan kor u dhaafsiisan oo xubno Ururka kiraystayaasha ka ah.




# Xubin ka ah Ururka Kireystayaasha

- Waxaanu wada xaajoodka kirada u sameynaa dadka kireystayaasha ah ee Iswiidhan degan badankooda. Markaad xubin ka tahay ayaa macluumaad heli doona wada xaajoodka ka hor iyo ka dib. In ka badan 4,000 oo xubnood ayaa sanad walba wada xaajoodka ka qeybqaata.
- Waxaad soo wici kartaa telefoonka si aad talobixin ugu hesho ama wakhti booqasho aad ku timaado ayaad qabsan kartaa.
- Waxaad adeeggayaga ka isticmaali kartaa bogga ururka kireystayaasha ee hyresgastforeningen.se.
- Waxaad heli doontaa taageero haddii adiga iyo deriskaagu aad rabtaan inaad degaanka aad ku nooshihiin ka sii wanaajisaan.
- Waxaad haysataa faa'iidooyin wanaagsan oo xubnuhu leeyihiin oo aad kala doordooraneyso. Tusaale ka mid ah waa caymiska guriga oo lagu saleeyey oo qiimahiisu u qalmo, caymiska Ururka kiraystayaasha.
- Waxaad heli doontaa joornaalka xubnaha ee Hem & Hyra sideed jeer sanadkii. Halkaas ayaad wax kasta ka akhrisan kartaa laga bilaabo warbixin baaritaano ah iyo wararka degaanka ilaa tijaabooyinka lagu sameeyo badeecada/alaabooyinka guriga iyo talooyin ku saabsan sharaxaada gudaha. Waxa uu Hem & Hyra leeyahay bogg internetka oo u gaar ah, hemhyra.se.

# Macluumaad dheeraad ah

Miyaad rabtaa inaad wax dheeraad ah naga ogaato, markaas ayaad ku soo dhawaan kartaa inaad naga soo wacdo telefoonka 0771-443 443 ama aad soo boo-qato bogga internedka ee hyresgastforeningen.se


**Xogta:**


- Tirada xubnaha: 535,000 qoys
- Tirada xubnaha la soo doortay: 8,950
- Tirada shaqaalaha: 870
- Tirada ururada kiraystayaasha ee deegaanka: 1,174
- Tirada ururada: 160
- Tirada goboladda 9

**Da'da xubnaha, kala qeybqeybin:**

- 0–25 sanno jir: 16 boqolkiiba
- 26–35 sanno jir: 17 boqolkiiba
- 36–45 sanno jir: 17 boqolkiiba
- 46–55 sanno jir: 16 boqolkiiba
- 56–65 sanno jir: 15 boqolkiiba
- 66–75 sanno jir: 10 boqolkiiba
- 75 sanno jir iyo waxa ka weyn 9 boqolkiiba

# Hyresgästföreningens regioner





Waxa uu Ururka kireystayaashu
ka shaqeeyaa sidii ay dadka oo dhami
ugu heli lahaayeen guri wanaagsan oo
qiimo macquul ah. Buug yarahan ayaad
waxyaalo dheeraad ah oo anaga nagu
saabsan ka akhriyi kartaa. Cidda aanu
nahay, waxaanu qabano iyo waxa aanu
u taaganahay.

Hyresgästföreningen

Wixii macluumaad dheeraad ah naga soo
booqo www.hyresgastforeningen.se